**XUKUMADDA SOOMALIYA**

**Sharciga lamba. 10 Jannaayo 1959, lamba. 2 rep**

**Xeerka loo baddalay dekeretda-harciga 20 Agoosto 1958, lamba. 3**

**MAAMULAHA**

Marka uu arkay oggolaashaha Golaha Xeer-dejinta;

**WUXUUSOO SAARAY OO ANSIXIYAY**

Xeerka soo socda:

**Qod. 1**

Waxaa loo baddalay Xeerka Dekereetda-sharciga 20 Agiisto 1958, lamba. 3 oo ay wehliyaan wax ka baddalka buugga la socda.

**Qod. 2**

Xukuumaddu, iyadoo qabanaysa doorashooyinka siyaasadeed ee soo socoda, waxaa loo oggolaaday in ay wax ku kordhiso Xeerka 25 Juun 1956, lr. 15, wax ka baddalka lagama maarmaan u ah iskuduwidda, wixii suurtagal ah buugga xeerka isaga ah ee Xeerka doorashooyinka siyaasadeed oo lagu daro xeerarka idil ee la xariira doorashooyinka maamul si ay noqdaan hal buug.

**Qod. 3**

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya.
**"ku daristta iyo wax ka baddalka Dekeereetda-Sharciga 20 Agoosto 1958, lamba. 3, iyadoo xeer u baddalkiisu Golaha Xeer-dejintuu uu ku oggolaaday hindise sharciyeedka lagu soo gudbiyay bogga la mida taarikhda iyo lambarka".**

**Qodobka Qura**

Qodobada 7, 10, 11, 27, 28, 31, 33, 35 ee Xeerka 25 Juun 1958, lamba. 15 " Doorashooyinka maamulka" waxaa lagu baddalay sida soo socota:

**Qod. 7**
**Shuruudaha Codbixiyaasha**

Waxaa loo dooran kara Golaha deegaanka muwaadiniinta soomaalida ee rag iyo dumar, kuwaaso:

1) — ku quranaa diiwaanka tirada deegaanka ugu yaraan 6 bilood ee laga soo bilaabo maalinta sagaashanaad ee doorashooyinka ka horreeya: kuwa ka soo dalaabay /haajiray maamul deegaan kale waxaa ku filan in ay ku qornaadaan laga soo bilaabo maalinta sagaashanaad doorashada horteed;

2) — in sanadka doorashooyinka ay u buuxsantay da'ada 18 sano;

3) — aanu ahayn kuwa laga xannibay ama waalan ama ku sugan xaalad looga mamnuucay xaafiisyada dawladda;.

4) — aan ku jirin xabsi.

**Qod. 10**
**Cabashada la Xariirta Liistada Guud Dadka wax Dooranaya**

Muddo aan ka badanayn maalinta lixdanaad ee doorashooyinka horteed, muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu arko liistada guud ee dadka wax dooranaya oo lagu keenay si waafaqsan qodobka hore iyo in uu soo gudbiyo cabasho ku saabsan qorista ama dayicidda, cabashooyinkaas waa in lagu keenaa maalinta ku xigta maalinta lixdanaad ee la soo sheegay. Iyaga waxaa go’aan ka gaaraya hal mar Guddoomiyaha Degmada iyadoo lagu soo hagaaajinayo warqad caadi ah marka uu dhagaysto Duqa Magaalada.

Guddoomiyaha degmadu waa in uu go’aan ku gaaraa konton cisho dhexdood oo doorashooyinka ka horreeeya; haddii aan cabashada go’aan laga gaarin waxaa loo qaadanayaa in la oggolaaday cabashada.

Go’aankas ama la’aanta go’aanka Guddoomiyaha Degmada, muwaadinka ay khusayso ama Duqa magaalada muddo ku siman 45 cisho dhexdooda ee ka horreeya doorashooyinka wuxxuu u dacwoon karaa Garsooraha Maxkamadda Degmada, kaaso muuddo kusiman 45 cisho dhexdood ee ka horreeya doorashooyinka ka gaaraya go’aan aan racfaan lahayn. Haddii Garsooruhu Degmada aanu go’aan ka gaarin muddada la soo sheegay, waxaa loo qaadanayaa in cabashada la aqbalay.

**Qod. 11**
**Lambarada iyo Tirada Liistada ee Deegaan Doorashada – Shahaadooyinka Doorashada**

Muddo ku siman maalinta soddonaad ee dorashada ka horreeys Duqa magaalada waa in uu:

— uu go’aamiyaa tirada Deegaan dorashooyinka, wax aan ka badayn 500 codbixiyeyaal deegaan doorasha kasta ee Deegaankiisa fasalka A iyo B iyo 400 codbiyeyaal fasallada C iyo D iyo sidoo kale goobahooda;

— in uu u sameeyo liistada codbixiyeyaalka deegaan doorasha kasta, ka sokow xogta lagu sheegay qod. 8 waa in ay leeyihiin meelo bannaan oo u gaara, oo loogu talgalay xubnaha deegaan doorashooyinka, arrimaha la xariira xasuus qoridda awoodaha;

— sameeyo shahaadooyinka doorashooyinka;

— ogaysiiyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddoomiyaha Gobolka, Guddoomiyaha Degmada iyo Garsooraa Maxkamadda Degmada tirada iyo goobta Deegaan doorashooyinka iyo sidoo kale tirada codbixiyeyaalka loo qoondeeyay deegaan doorasho kasta;

— ku wargaliyo dadweynaha, baaq, iyo naado tirada iyo goobta.

**Qod. 27**
**Liistada aan la Aqbalin – Cabashooyinka**

Haddii ay dhacdo in aan la qaban kiistada musharaxiinta ama liddi ku ah go’aanada la xariira go’aamada Guddoomiyaha Degmada ama qof uu isagu wakiishay, ergada waraaqaha soo qoray ee ku xusan faqradda ugu dambaysa ee qod. 22, waxay u soo gudbin karan cabasho qoraala Garsooraha Degmada muddo ku siman 45 cisho ee ka horreya malinta doorashooyinka. Garsooraha Degmadu waa in uu go’aan ka garaa 40 cisho dhexdood ee ka horreeyaa maalinta doorashooyinka iyadoo aan wax racfaana aanu ka furnayn. Haddii aan muddadaas dhexdeed go’aan laga gaarin, cabashada waxaa loo qaadanayaa in la aqbalay

**Qod. 28**
**Nuqulka/Koobiga Liistada**

35 cisho dhexdood ee manta doorashooyinka ka horreya Guddoomiyaha Degmada wuxuu u gudbinayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddoomiyaha Gobolka, Garsooraha Degmada iyo Duqa magaalada nuqullada liistada musharaxiinta uu qabtay ee si caadiya loo hubiyay, la siiyay lambarro sida ay usoo kala horreeyeen, oo ay wehliyaan samballo midkasta summadahiisa wata, iyadoo loo caddeynayo Wasaaradda tirada codbixiyeyaasha deegaan doorasho kasta sida uu soo sheegay Duqa magaalada si waafqasan qod. 11.

**Qod. 31**
**Deegaan Doorashooyinka**

Deegan doorashooyinka waxay, ka koobanyihiin Guddoomiye iyo laba tireyaal ah, kuwaaso midka ugu da'ada wey uu qabanayo xilka Guddoomiye Ku-xigeenka. Deegaan doorashokasta waxay yeelanaysaa Xoghaye.

Guddoomiyaha iyo tiriyeyaalka waxaa laga soo xulanayaa codboxiyeyaalka, hasayeeshe Xoghayaha wuxu xitaa noqon karaa qof aan ka mid ahaayn codbiyeyaasha. Giddigood waxaa lagu magcaabayaa soo jeeinta Duqa magaalada, Guddoomiyaha Degmada, kuwaaso xitaa baddali kara haddii loo baahdo.

**Qod. 33**
**Xafiisyada Doorashooyinka Deegaanka**

Xaafiiska deegaanka wuxuu ka koobanyahay Guddoomiye, laba xubnood iyo Xoghayaha.

Waxaa ka mida Xaafiiska la soo sheegay xita laba qof oo u xilsaran tirinta xisaabta. Guddoomiyaha iyo labada xubnood waa in ay noqdan codbixiyeyaal; Xoghaya iyo labada tirinta qaabisan waxay noqon karaa kuwa aan ahayn codboiyeyaal. Giddigood waxaa lagu magcaabayaa soo jeedinta Duqa magaalada, Guddoomiyaha Degmada, kuwaaso xitaa la baddali kara haddii loo baahdo.

**Qod. 35**
**Waajibnimada Xilalka, Wargalinnta iyo Dhaaarta**

Xilalka lagu soo sheegay cinwaankaan waa kuwa wajiba.
Qofna lagama dhaafi karo dhanna loogama leexan karo haddii aanay jirin sababa la caddeeyay. Magacaabidda waa in la sameeyaa oo la wargaliyaa dadka ay khusayso 10 cisho ka hor maalinta la muddeeyay doorashooyinka.

Inta aanu xilka qaban, qof kasta oo ka mida deegaan doorashada ama Xaffiiska doorashada waa in uu ku dhaarta sida soo socota:

" Waxaan magaca Ilaahay ku dhaaranayaa in aan u gudanyo hawlaha doorashada ee la igu aaminay si xilkasnimo, daacadnimo iyo anigoo si taxaddara sharciga uilaalinaya". Xeerkaan waxaa lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka. Iyado qof waliba ay waajib ku tahay in uu u hoggansamo iyo ilaaliyo ka xeer ahaan Soomaaliya.

Taariikhda, Muqdisho, 10 Jannaayo 1959.

Maamulaha
**Mario Di Stefano**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**
**Xaaji Muuse Boqor**